



## Wixii nagu saabsan

Australian GLBTIQ Multicultural Council (AGMC Inc) waa urur tabaruc ah oo uu maamulo urur bulsho oo u dooda bulshooyinka diimaha kala duwan ee LGBTIQ. Waxaanu aaminsanahay in aan qofna lagu takoorin hab ku salaysan jinsiyadooda, qawmiyadooda, waxay aaminsan yihiin, diintooda iyo aqoonsigooda LGBTIQ.

## Waxaan Qabano

Urur yar ahaan, waxaan u doodnaa isbedel samaynta. Waxaan sidaas u samaynaa annaga oo:

- Siinaynatalo aqoon kusalaysan Xukuumada iyo ururada bulshada;
- Qabanayna cilmi baaris ku saabsan waaya-aragnimada dadka dhaqan ahaan iyo diin ahaan kala duwan ee bulshooyinka LGBTIQ;
- Siinayna waxbarasho iyo tababarka kala-aragti duwanaanta, ka mid ahaanta iyo lahaanshaha;
- Qabanqaabinta munaasabad bulsho oo joogto ah iyo dhexgalka dadka dhaqamada kala-duwan;
- Ka hadlida shirarka, kulamada, munaasabadaha bulshada si kor loogu qaado ka mid ahaanta iyo lahaanshaha.

## Taariikhdayada

Kooxo tabaruca ayaa bilaabay AGMC sanadii 2004ka dib markay arkeen baahida in laga wada hadlo arrimaha khuseeya dhaqamada kala duwan iyo bulshooyinka LGBTIQ oo leh diima kala duwan. Shir kayagii ugu horreeyey, ee Ku-Noolaanta iyo Jeclaanta ee Kala-duwanaanshaha, waxaa lagu qabtay St Kilda Town Hall bishii Oktoobar 2004 waxaana ka soo qaybgalay 250 xubnood oo bulshada ka

tirsan, kuwa dadka u hadla, aqoonyahano, iyo kuwa haga siyaasada. Waxaa loo arkayey shirkii ugu horreeyey Australia gudaheeda khaasatan waxaa loo hibeeyey dhaqamada kala duwan iyo bulshooyinka LGBTIQ. Shirkii ku xigay ee 2006 iyo 2018 ayaa iyaguna ahaa muhiim maadaama ay keeneen xubno kala duwan oo ka tirsan bulshada si looga wada hadlo arrimaha iyada loo dabaaldegayo aqoonsigayaga gaarka ah iyo waaya-aragnimada muuqata.

Waxaan sii wadaynaa in aan u doodno xuquuqda iyo mid ahaanshaha bulshooyinka LGBTIQ ee diin ahaan iyo dhaqan ahaan kala duwan. Xubnahayaga waxaa ka mid ah:

- Dadka katirsan bulshooyinka soo-galootiga ah (kuwa cusub, kuwa soo koraya, iyo kuwa hana qaaday);
- Dadka madow; iyo dadka midabka leh; iyo
- Bulshooyinka leh caqiidada.

Urur yar ahaan, waxaanu sii wadaynaa in aan saamayn yeellano si aan isbedel u keeno. Sanadii 2018 waxaanu daabacnay buugga loo yaqaan *Living and Loving in Diversity: An Anthology of Multicultural Queer Adventures*. Buuggaasi wuxuu sahamiyaa qalafsanaanta iyo qaninimada codadka dadka dhaqamada iyo caqiidooyinka kala duwan kuwaas oo qayb ka ah bulshaweynta Australia. Waxay kaloo u dabaaldegtaa aqoonsigayaga gaarka ah.

Annaga oo adeegsanayna tababarada AGMC, waxaanu ka tababarnay hay'ado badan mawduucyada soo socda ee ku saabsan:

- Ogaanshaha LGBTIQ;
- Dhaqamada badan iyo caqiidooyinka bulshooyinka LGBTIQ;
- Kala-aragti-duwanaanta;
- Lahaansho iyo ka midnoqosho

Munaasabadahayaga bulsho, United We Feast, waxay siiyaan amaan, ka mid noqosho, gole soo dhowaynaya kala-jaadnimada, ka mid ahaanshaha iyo soo dhowaynta xubnaha kala duwan ee bulshooyinka LGBTIQ, xulafada iyo saaxiibada si la isugu yimaado kala duwanaanshaha la isuguna yimaado looguna dabaaldego kala-jaadnimada ka jirta bulshooyinka LGBTIQ dhexdooda iyo wixii ka shisheeya.

## Kala-aragti-duwanaanta

Waxaan isticmaalaa xayndaabka kala-aragti-duwanaanta shaqadayada. Kala-aragtiduwanaanta macneheedu waa isku-darka labo astaamood ama ka badan kuwaas oo caawima qaabaynta kuwaan nahay qof ahaan. Astaamahaas waxaa ku jiri kara laba ama ka badan kuwaan soo socda:

- Qawmiyadayada;
- wadaniyadayada;
- Caqiidadayada/diintayada;
- Astaanta dhaqankayaga;
- lintayada;
- Da'dayada;
- Taariikhdoyada soo-haajirida;
- Rabitaanka galmada;
- Astaantayada sinjiga;
- Astaamaha galmoodkayaga;
- Iyo wax intaas ka badan.

Waxaanu aamisanahay in aanaan ka dooran astaantayada LGBTIQ dhaqankayaga iyo/ama astaanta diintayada; waxaanu u dabaaldegnaa dhamaan astaamahayaga gaarka noo ah.

## Sidee Loogu Lug Yeellan Karaa?

Markaanu sii kornaba, waxaanu raadinaynaa in dad xiisaynaya inay qayb ka noqdaan qoyskayaga. Waxaanu raadinaynaa dad tabaruciin ah oo naga caawima munaasabadahayaga, shirarka iyo xarakaadka ku salaysan bulshada. Nagala soo qaybgal xubin ahaan qaybna ka ahow ururka qaatay una dabaaldegaya kala-jaadnimada, kala-aragti-duwanaanta, ka mid ahaanta iyo lahaanshaha.

## Sidee loola socdaa mar walba?

Si aad ula socoto xarakaadkayaga, ku soo biir boggayaga Facebook-ga:



<https://facebook.com/multiculturalgltiq>

Waxaad kaloo iska qori kartaa emailka-yaga si aad u hesho warar iyo waxyaallaha cusub:



<https://www.agmc.org.au/join-newsletter>

Ama, noo soo dir email si aad u ogaato waxyaallaha ku saabsan ururkayaga:



[contact@agmc.org.au](mailto:contact@agmc.org.au)

Waxaan sugaynaa in aan kugu soo dhowayno qoyskayaga AGMC.

